



## Iftiiminta Dadaalkeena

### IN CUNTADA CAAFIMAADKA LEH LAGA YELO MID LAGA IIBSAN KARO DUKAAMADA SOOMAALIDA



Bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda, dukaamo dhaqmeedku waa kuwo lagu tiirsan yahay si guryaha loogu kariyo cunto caafimaad leh iyo in darisku isu yimaadaan.

Haweenka, dhallaanka, iyo caruurta (WIC), waa barnaamij deeq federaal ah oo siiya bulshada dhaqaalahoodu hooseeyo aqoon cunto caafimaad leh iyo nafaqo. Laakinse maadaama ganacsatadaasi yar yar la' yihiin ilihii ay ku heli lahaayeen iyo heysiga shahaadada WIC, maacaamiishu waxa ay awoodi waayeen iney jeegagooda WIC ka isticmaalaan dukaamada Soomaalida si ay u iibsadaan cunto ku habboon dhaqankooda, taasi oo macnaheedu yahay in cuntada daruuriga ee makhaayadaha iyaduna ay ahaato mid aan la awoodin.

Sannadkii ugu horreeyey ee PICH, 30 dukaan oo Soomaali ah ayaa ka helay taageero iyo gacan siin farsamo he'yad lagu magacaabo OneAmerica—oo la mataano ah PICH—si loo helo loona xajisto WIC. Heysadka Shahaadada WIC, waxa ay dukaamada awood u siineysaa iney si toos ah ka iibiyaan cunto caafimaad leh famillada dhaqaalahoodu hooseeyo. Dukaamada ka qeyb qaadanayey waxa ay asaaseen Ururka Dukaanleyda Soomaalida Mareykanka si ay uga hadlaan hagaajinta WIC si looga yeelo waxyaalaha barjaamijka looga baahan yahay mid u sahlaya ganacsatada tafaariqda, iyo mid ku habboon dhaqan ahaan bulshada Soomaaliyeed iyadoo lagu kordhinayo tarjumaad iyo cuntada Xalaasha ah. Shaqada OneAmerica ma aha oo kaliya in la kordhiyo u helitaanka cunto la yaqaan oo caafimaad leh dadka dan yarta iyo muhaajiriinta ah. Shaqadeedu waa beddelaad lagu sameeyo nidaamka, iyadoo isla markaana hagaajineysa ganacsigooda iyo xoojinta codkooda bulsho ahaan.

Iskaashi lagu hormarinayo Caafimaadka Bulshada

